Safarka Buugaagta Busload: Booqashada Iskuulka iyo Warbixinta Cilmi Baaris

Dhowr isbuuc gudaheyd, qoraayasha iyo sawir sameyaasha buugaagta caruurta oo aadka loo amaanay Matthew Swanson iyo Robbi Behr ayaa soo booqan doono iskuulkiina, ayagoo qaban doono bandhig uguna deeqi doono ardayda iyo macalimiinta buugaag. Booqashadoodu waa qeyb kamida safarka Buugaagta ee Busloads, halkaas oo ay Robbi, Matthew, iyo afartooda canug ay ku qaadan doonaan sanad dugsiyedkoda 2022 - 2023 in ay ku safraan dalka ayagoo booqanaya iskuulada u qalma Title 1 gobol walbo ayagoo rajeynaya in ay dhiiro geliyaan hal abuurka, aqrinta, iyo in la sheekeyo.

Warbixinta Cilmi Baarista
Safarka Buugaagta ee Busloads waxa uu ka dhigan yahay fursad naadira oo u muhiima cilmi baarayaasha waxbarasho, si ay u fahmaan saameynta ay qorayaasha iyo sawir sameyaasha ku leedahay booqashada ay booqanayaan ardayda, macalimiinta iyo dugsiyada. Dhamaadka, waxaan diyaarinay qormo sahmin oo cabireysa sida ay caruurtaadu u fikiraan iyo waxa ay u heystaan aqriska iyo qoraalka. Ardayda ka qeyb qaadaneysa waxaa ay dhameystiri doonaan sahmin qoraal oo 5-daqiiqo ah kahor bandhiga, iyo mid kale isla markii uu dhamaado ka dib, iyo mid kale hal bil kadib. Cilmi baarayaasha ma ogaan doonaan magaca ilmahaaga ama garan doonaan warbixin lagu ogaanayo, sababtoo ah sahmintu waa mid qarsoon oon cidna lagu ogaan karin.

Cilmi baaristan waxaa qaadaya barafasooro katirsan Waaxda Waxbarashada iyo Cimiga Bulshada ee Washington College ee maagalada Chestertown, Maryland. Waxii warbixin dheeriya oo mashruuca ku saabsan waxaa lagusoo gudbin doona dukumiinti labaad iyo muuqal online ah.

AQBALIDA KA QEYB QAADASHO EE SAHMINTA CILMI BAARIS
Waxaad xaq u leedahay in aad go'aansato in uu ilmahaaga ka qeyb qaato mashruucan cilmi baarista. Maalmaha soo socdo, waxaa kusoo gaari doono foom fasax ogolaansho ah oo aad ku ogolaan karto ama ku diidi karto ka qeyb galka cilmi baaristan. Ardaygaaga waa la wareysan doona haddii uu rabo in uu dhameyo sahminta, wax ciqaab ahna ma jirto haddii uu diido.

SU'AALLO?
Si aad waxbadan uuga ogaato Robbi iyo Matthew,booqo bogga ay internetka ku leeyihiin ama barahooda bulshada:

- Bogga: https://robbiandmatthew.com/

- Instagram: https://www.instagram.com/robbi.and.matthew/

Si aad waxbdan uuga ogaato Safarka Buugaagta ee Busload, aqri qormo qoraaledkan ee *Publisher's Weekly*

- "Safarka Buugaagta ee Busload Waa Fikir Weyn" waxa qoray Joanne O'Sullivan

Haddii aad wax su'aallo ah ka qabto cilmi baarista,Fadlan la xiriir kooxda cilmi baarista ee Washingto College.

Dr. Sara Clarke-De Reza, Hogaamiyaha Kooxda Cilmi Baarista: sclarkedereza2@washcoll.edu ama research@robbiandmatthew.com